

Maxaa dhaca inta lagu jiro hawsha xoojinta qaanuunka?

- ⇒ Sarkaalka Xoojinta Qaanuuka (CEO) ayaa bixiya ogeysiis xadgudub (tigidh) marka uu helo qaanuun lagu xadgudbay. Ogeysiisku wuxuu ku siinayaa muddo macquul ah oo loogu hoggaansamo.
- ⇒ Wuxuu sarkaalka CEO isku dayaa in uu la xiriiro qofkii la siiyay tigidhka si uu ugala shaqeeyo xallinta xadgudubka.
- ⇒ Muwaaddiniinta la siiyo tigidhka waxay xaq u leeyihiin in ay racfaan ka qaataan tigidhka oo hor tagaan Guddiga Daryeelka Hantida ama Guddiga Habaynta Degaanka.
- ⇒ Kiisaska 85% waa loo hoggaansamaa; hase yeeshee haddii aan xadgudubka la sixin, wuxuu sarkaalka CEO ku talin karaa in dacwo sharci ah la hor geeyo Waaxda Degaanka ee Maxkamadda Minishiibiyada Degmada Franklin.

**Waaxda Xoojinta
Qaanuunka**
111 N. Front St
3rd Floor.
Columbus, OH 43215



***Si aad u soo gudbiso
xadgudub dhici kara,
fadlan soo wac
(614) 645-3111
Ama booqo
www.columbus.gov***

THE CITY OF
COLUMBUS
ANDREW J. GINTHER, MAYOR

THE CITY OF
COLUMBUS
ANDREW J. GINTHER, MAYOR

Xoojinta Qaanuunka

Hiigsigeenna:

In aan sare u qaadno tayada nolasha xaafadaha Columbus iyada oo la hirgelinayo oo la xoojinayo qaanuunka beledka ee guryaha, deegaanka, farshaxanka, Caafimaadka, faya-dhowrka, iyo amniga.





Xoojinta Qaanuunku waxay mas'uul ka tahay

Qaanuunka Guriyeynta, kaas oo adkeeya tayada kumannaanka hoy, qaybaha hoyga, iyo qolalka guryaha magaalada Columbus;

Qaanuunka Degaanka, kaas oo xeeriya isticmaalka dhulka iyo xarumaha shatiga leh sida goobaha qalabka kharaaba;

Qaanuunka Hagaajinta Bilicda, kaas oo wax ka qabta xaaladaha hantida bannaan iyo kuwa dayacan ee ku yaalla magaalada;

Qaanuunka Caafimaadka, Fayadhowrka iyo Amniga (Bii'ada), oo xeeriya cawska dheer, saaq, qashinka adag iyo dayactirka iyo nadaafadda guud ee hantida magaalada, iyo;

Qaanuunka Farshaxanka, kaas oo xoojiya sharciga ku saabsan tabbeellayaasha nooc walba leh ee ku yaalla magaalada

XADGUDUBKA QAA NUUNKA

Guryaha (Gudaha):

- Korontada, alxanka, iyo dhismaha aan si sax lahay oo hagaajin
- Xaalad aan nadiif ahayn
- Xaalad isku raran ah
- Hoy aan ku habboonayn in dad ku noolaado
- Dhisme aan nabad ahayn
- Qiiq sheege maqan ama aan shaqaynayn
- Cayayaan leh

Guriga (Bannaanka):

- Fooqa, saqafka, darroorta iyo tubooyinka roobka qaada
- Daaradda iyo jaranjarooyinka
- Geesaha, daaqadaha, albaabbada, aasaaska
- Dusha looxa oo muuqata ama aan waxba la marin
- Qaabka agabka (garaashka, sheedda)
- Hagaajinta deyrka
- Dhismayaasha bannaan oo aan la sugin ama la hagaajin

Caafimaad, Fayadhowr & Amni:

- In si nadiif ah loo hagaajiyo dhismaha
- Qashin, jajab, & qashin adag
- Saaq foolxun iyo cows dheer (ka dheer 12")
- Nagaar iyo geedo ka dul baxaya oo soo galay marinka
- Nadaafadda xayawaanka
- Doolli, cayayaan, rinji-kac, iyo xasharaad kale

XADGUDUBKA U BADAN EEE QAA NUUNKA

Degaanka:

- Bannaanka oo la dhigo qalab kharaabay, alaab, qalabka gaadiidka, iyo qalabka guryaha
- Baabuur la dhigo meel aan dhismayn
- Baabuur aan shaqaynayn oo taal hanti gaar loo leeyahay
- Baabuurta ganacsiga oo la dhigo xaafado la deggan yahay
- Dhigashada doomaha, rimoorka, RV-yada, tareellaha goob aan la oggoleyn.
- Garaashyada hagaajinta gaadiidka oo ku yaal xaafado la deggan yahay.
- Meherado aan munaasab ahayn oo ku yaal xaafado la deggan yahay
- Xaraashka daaradda ee mamnuuca ah (ka badan muddada loo cayimay)
- Tabbeelle iyo farshaxan mamnuuc ah
- Xadgudub naqshadda goobta

